Kooxda dhiiggaaga iyo uurka

Buug-yarahaan wuxuu kuu macneynayaa baaritaanyada la samayn karo intii aad uur leedahay sidii loo:

- ogaado kooxda dhiiggaaga;
- ogaado kooxda Rhesus; iyo
- raadiyo unugyada difaaca jirka .

Dadka ku xannaaneyo intii aad uur leedahay waxay u baahan yihiin inay ogaadaan kooxda dhiiggaaga sidii diyaar loo ahaado haddii aad u baahan tahay in dhiig lagugu shubo. Waxaa xittaa muhiim ah in la ogaado kooxdaada Rhesus.

Waa maxay kooxdaada Rhesus?

Kooxdaada dhiigga wuxuu ahaan doonaa hal ka mid ah afartaan kooxo ee wayn:

- kooxda O;
- kooxda A;
- kooxda B;
- kooxda AB.

Waxaad xittaa leedahay koox dhiig oo kale ee lagu magacaabo kooxda Rhesus. Waxaad noqon kartaa Rhesus bositif ama Rhesus negatif. Tusaale ahaan, kooxda dhiiggaaga wuxuu ahaan karaa ‘kooxda O Rhesus bositif’.

Waa maxay unugyada cas ee difaaca jirka ?

Unugyada difaaca jirka waxay jirkaaga ka difaacaan wax walba uu jirkaaga u qato inuu ajnabi ka yahay. Unugyada cas waxay dhiiggaaga ku qaadaan oksijiinka. Jirkaaga wuxuu soo saari karaa unugyada difaaca jirka haddii unugyo dhiig ee koox dhiig kale soo galaan dhiiggaaga. Kani wuxuu dhici karaa markii dhiig lagugu shubo ama ilmahaada ayaa ku gudbin karo dhiiggaaga intii aad uur leedahay.

Unugyada cas waxay mari karaan dhiiggaaga waxayna gaari karaan ilmahaada. Kani wuxuu wax gaarsiin karaa dhiigga ilmahaada. Mar-mar wuxuu dhallaanka ku sababi karaa xaalad dhif ah ee lagu magacaabo cudurka haemolytic (HDN). Calaamadaha HDN waxaa ka mid ah cagaarshow iyo dhiig-yaraan (kaaso sabab u ah unugyada cas ee jirka ku yar). Dhallaanada markuu kani ku dhaco waxay caadi ahaan u baahan yihiin in isbitaalka la jiifiyo iyo waxaa laguu daaweeya daawo ilays iyo mar-mar dhiig ayaa lagu shubaa.

Information for Women

© Public Health Wales

Miyaa laga hortagi karaa cudurka haemolytic ee dhallaanka (HDN)?

Haddii aad tahay Rhesus negatif iyo ilmahaada yahay Rhesus bositif, markaa jirkaaga wuxuu soo sari karaa unugyada difaaca jirka si uu u baabi'iyo unugyada cas ee Rhesus bositifka 'ajnabiga' ah. Kani wuxuu marmar dhacaa markii aad uur leedahay, iyo badanaa markuu cunugga dhasho. Haddii aad tahay Rhesus bositif, dhibaatadaan caadi ahaan ma dhici doono.

Si looga hortago HDN, haddii aad tahay Rhesus negatif waxaa lagu siin doonaa cirbadeyn ama cirbadeyn ku jiro daawada anti-D immunoglobulin intii aad uur leedahay iyo dhalidda ka dib haddii uu cunugga yahay Rhesus bositif. Kani wuxuu jirkaaga ka joojin doonaa samaynta unugyada iska-difaaca Rhesus iyo wuxuu yareynayaa halista dhibaatoyinka uurarka ee mustaqbalka.

Waa maxay anti-D immunoglobulin?

Anti-D immunoglobulin (cirbadeyn) waa badeecad dhiig oo laga sameeyey dhiig laga soo aruuriyey dadka dhiigga deeqo.

Miyuu anti-D immunoglobulin badbaadsan yahay?

Marmar anti-D immunoglobulin wuxuu sababi karaa ficil-celin xasaasiyadeed. Soo saarkiisa si adag ayaa loo ilaaliyaa sidii looga hortago in fayrus layskugu gudbiyo.

Waa maxay faa'idoyinka samaynta tijaabada baarista kooxda dhiigayga iyo unugyada difaaca jirka ?

Bilowga uurkaaga waxaa lagugu samayn doonaa tijaabo dhiig.

Haddii aad ogolaato in baaritaanka lagugu sameeyo, waxaad ogaan doontaa kooxda dhiiggaaga iyo haddii aad tahay Rhesus bositif ama Rhesus negatif. Waa dhif in la ahaado Rhesus negatif. Qiyaas ahaan 15% (boqoolkiba 15) ee shacbiga ayaa ah Rhesus negatif.

Baaritaanka waxaa xittaa lagu eegi doonaa unugyada difaaca jirka . Waa muhiim in kani la ogaado sidii diyaar loo ahaado haddii aad weligaaba u baahato in dhiig lagugu shubo laguu helo mid badbaado ku ah. Marar dhif ah, unugyada difaaca jirka ku jiro ee dhiigaaga waxay sidi karaan halista in wax gaaro ilmahaada sida kor lagu macneeyey. Haddii uu kani dhaco adiga iyo ilmahaada waxaa idinla siin karaa xannaano takhasuusan. Tijaabadaan dhiigga waxaa mar labaad la sameeyaa markii aad gaarto 28 toddobaad oo uur ah.

Information for Women

© Public Health Wales

Waa maxay faa'ido-darrada samaynta tijaabada baarista kooxda dhiigayga iyo unugyada difaaca jirka ?

Tijaabada baarista waa tijaabo dhiig ee fudud. Halista wuxuu la mid yahay tijaaboyinka dhiigga ee kale.

Halkee lagu qaban doonaa baaritaanka?

Umulisadaada ayaa kuu sheegi doonto meesha lagu qabto.

Natiijoyinka

Natiijadeyda baaritaanka miyuu ahaan doonaa mid qarsoodi (sir) ah?

NHS'ta waxay natiijoyinka dhammaan baaritaanyada ku hayaan si qarsoodi ah. Siyaasadda isbitaalka ee ku saabsan inta qofood ee arki karo natiijoyinka baaritaanyadaada wuu kala duwan yahay. Umulisadaada ayaa kuu macneyn doonto hab-socodyada deegaankaaga.

Sidee uu heli doonaa natiijada baaritaankeyga?

Umulisadaada ayaa kuu sheegi doonto habka iyo goorta aad heli doonto natiijada baaritaankaaga. Waa inaad natiijada heshaa seddax toddobaad gudeheeda laga bilaabo maalinta dhiigga lagaa qaadey.

Tijaaboyinka cudur-aqoonsiga kooxda dhiigga iyo unugyada cas ee difaaca jirka

Baaritaanka kooxda dhiigga iyo unugyada cas ee difaaca jirka waa mid aad sax u ah. Mar mar waxaad u baahan doontaa baaritaan dhiig ee dheeraad ah haddii dhibaato la helo ama laga shakisan yahay.

Haddii aad og tahay inaad tahay Rhesus negatif

La xirir umulisadaada ama takhtarkaaga sida ugu dhakhsi badan si aad u xasuusiso inaad tahay Rhesus negatif haddii

- aad siilka ka dhiig-baxayso 12 toddobaad ka dib;
- ilmo dhicis kugu dhaco 12 toddoobaad ka dib; ama
- uu caloosha dhaawac kaa gaaro (tusaale ahaan, dhaawaca suunka kursiga gaariga markii shil la galo ama markii aad dhacdo).

Information for Women

© Public Health Wales

Haddii waxyaabahaan dhacaan, jirkaaga wuxuu bilaabi doonaa inuu soo saaro unugyada difaaca jirka iyo waxaad uu baahan kartaa cirbadeynta anti-D.

Waa maxay sababta laa ii siin doono cirbadeynta anti-D?

Waa in lagu siiyaa cirbadeyntan anti-D si loo yareeyo halista soo saarka unugyada difaaca jirka . Waa in lagu siiyaa cirbadeynta anti-D markii ay jiraan xaaladahaan:

- Lagugu sameeyo amniocentesis.
- Lagugu sameeyo chorionic villus sampling.
- Markii aad ilmahaada dhasho (caadi ahaan haddii uu cunugga yahay Rhesus bositif).
- Aad uu uurka ku jiro tubooyinka ukumaha qaado.
- Aad joojiso uurkaaga.

Xasuuso inaad u sheegto xirfadle caafimaad walba ee ku xannaaneeyo inaad tahay Rhesus negatif.

Waxay baari doonaan heerka unugyada difaaca jirka intii aad uur leedahay. Waxaa xittaa lagu siin karaa cirbadeynta anti-D intii aad uur leedahay si la isku dayo in laga hortago dhibaatooyinka.

Maclumaad dheeraad ah

Waxaad umulisadaada ama takhtarkaaga isbitaalka ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Rhesus negatif.

Buug-yaraha Kooxda Dhiigga iyo Unugyada Cas ee Difaaca jirka markii uur la qabo. Waxaa laga heli karaa:
http://hospital.blood.co.uk/library/patient_information_leaflets/leaflets/index.asp
(La soo galey 22/09/09)

© Xuquuqda Daabacadda 2010. Ururka NHS ee Caafimaadka Shacbiga Wales. Dhammaan xuquuqyada u xiran. Lama ogola in gebi ahaan ama qayb ahaan nuqul laga sameysto ayadoo fasax laga helin milkiilaha xuquuqda daabacadda.
www.antenatalscreening.org
Abriil 2010
BG Daabacadda 9aad

Information for Women
© Public Health Wales